

3SQUARESVT-KA SNAP!

Qaab fudud oo dadka reer Vermont ee waayeelka & naafada ah u heli karaan 3SquaresVT.

Waxa aad adeegsan kartaa arjigan haddii QOF KASTA oo codsanayaa:



- ➔ Yahay ugu yaraan 60 sano jir ama uu helo gunnooyinka naafada, OO
- ➔ Dakhli aanu ka helin shaqo ama is-shaqaalaysiin, OO
- ➔ Iibsado cuntada oo si wadajir ah loo samaysto cuntooyinka.

SIDA LOO CODSADO

Waxa aad adeegsan kartaa arjigan si aad u codsato 3SquaresVT-ka SNAP— oo ah barnaamij kaa caawin kara inaad hesho cuntooyin caafimaad qaba, oo nafaqo leh. Haddii aad sidaas samayso, waxa aad sidoo kale u adeegsan kartaa inaad ku codsato Kaalmada Shidaalka.

1. Dhammaystir bogagga 1 illaa 4 ee kamid ah arjiga.
2. Su'aalaha uga jawaab si dhammaystiran oo daacad ah. Waxa aanu xaqiijin doonaa macluumaadka aad bixiso annagoo ka xaqiijinayna saraakiisha heer federaal, gobol iyo degmeed.
3. Waxa aad saxeexdaa halka hoose ee bogga 4.
4. Waxa aad u dirtaa arjigaaga: DCF - Qaybta Adeegyada Dhaqaale, Xarunta Ku Shaqada leh Arjiga iyo Dukumintiga, 280 State Drive, Waterbury, VT 05671-1500.

IKHTIYAARI: Hawsha si dhakhso ah u bilaw adiga oo bixinaya ugu yaraan magacaaga, cinwaankaaga iyo saxeexaaga. Gunnooyinku waxa ay bilaabmi doonaan laga bilaabo taariikhda aanu helno arjigaaga oo ay ku xusan yihiin waxyaabahan.

MA QABTAA SU'AALO? CAAWIMO MA UGA BAAHAN TAHAY CODSIGA?

- ➔ Waxa aad ka wacdaa Xarunta Adeegga Gunnooyinka lambarka 1-800-479-6151.
- ➔ Haddii aad tahay da'da 60 ama ka weyn tahay, waxa aad sidoo kale Laynka Caawimaadda ka wici kartaa lambarka 1-800-642-5119.
- ➔ Haddii aad leedahay naafanimu maqalka ama hadalka ah, waxa aad wacdaa 7-1-1 ee loogu talagay adeegga dadka naafada ka ah maqalka ama hadalka.

Haddii aad u baahan tahay adeegyo turjumaad...

(Carabi) 1-855-247-3092 إذا أنت ترغب خدمات الترجمة الفورية اتصل برقم

Ako su Vam potrebne usluge tumačenja, pozovite 1-855-247-3092. (Boosniyaan)

စကားပြန် ဝန်ဆောင်မှုလုပ်ငန်းကိုအလိုရှိပါက 1-855-247-3092 သို့ ဖုန်းဆက်ခေါ်ပါ။ (Burmiis)

Si vous avez besoin de services d'interprétation, appelez le 1-855-247-3092. (Faransiis)

Mugihe woba ushaka impfashanyo yo gusigurirwa, hamagara uyu murongo 1-855-247-3092. (Kirundi)

यदि तपाईंलाई दोभाषे सेवाको जरुरत परेमा 1-855-247-3092 मा कल गर्नुहोस्। (Nepali)

Haddii aad u baahan tahay adeegyo turjumaan, wac 1-855-247-3092. (Soomali)

Si usted necesita servicios de interpretación, llame al 1-855-247-3092. (Isbaanish)

Ikiwa unahitaji huduma za ukalimani, piga simu 1-855-247-3092. (Sawaaxili)

Nếu quý vị cần dịch vụ thông ngôn, hãy gọi 1-855-247-3092. (Fiitnaamiis)

XAQIIQOYIN MUHIIM AH OO AY TAHAY IN LA OGAADO

XUQUUQAHA DADKA NAAFADA AH

Ma qabtaa xanuun jidheed, maskaxeed ama waxbarasheed oo kaa carqaladaynaya inaad samayso waxyaabaha aanu kaa dalbano inaad samayso? Haddii ay sidaas tahay, waxa aanu sameyn karnaa isbeddelo si aanu kuu caawino. Sharciga Maraykanka ee Dadka Laxaadka La' (The Americans with Disabilities Act, ADA) iyo sharciga Vermont waxa ay sheegayaan inay tahay inaanu isbeddelo samayno si dadka naafada ahi ay u heli karaan gunnooyinka dawladda. Isbeddeladan waxa loo yaqaanaa *fudaydino macquul ah*. Halkan waxa ah waxoogaa tusaalayaal ah:

- Qof ayaa kuu qori kara jawaabahaaga haddii aanad awoodin.
- Waxa aanu ku siin karnaa wakhti dheeraad ah ama waxa aanu kaa caawin karnaa inaad hesho dukumintiyada aad u baahan tahay inaad na siiso.
- Qof ku taageera ayaa kula joogi kara marka aad nala hadlayso.
- Waxa aanu kuu soo diri karnaa dukumintiyada ku qoran far waaweyn si aad u akhriyi karto.
- Waxa aanu ku kulmi karnaa gurigaaga ama ka wada hadli karnaa taleefan ahaan si aanad ugu qasbanaanin inaad timaaddo xafiiska degmada.

Haddii aad nooga baahato inaanu kuu samayno isbeddel kan oo kale ah, fadlan waxa aad naga soo wacdaa lambarka 1-800-479-6151.

XAALADDA QAXOOTINIMO

Keliya muwaadiniinta Maraykanka iyo qaar ka mid ah dadka aan muwaadiniinta ahayn ayaa heli kara gunnooyinka. Haddii qoyskaaga ay ku jiraan dad aan u qalmin xaaladdooda qaxootinimo awgeed, weli waxa aad u codsan karaa xubnaha u qalma. ESD waxa ay xaqiijin doontaa xaaladda qaxootinimo ee dhammaan dadka aan muwaadiniinta ahayn ee soo codsada gunnooyinka Adeegyada Muwaadinimada iyo Qaxootiga ee Maraykanka. Uma baahnid inaad bixiso macluumaadka qaxootinimada dadka aan codsaneyn gunnooyinka, balse waa inaad ku darto macluumaadka kale sida dakhligooga iyo khayraadkooga.

BAYAANKA TAKOOR LA'AANTA USDA (HA U DIRIN ARJIYADA USDA)

Si waafaqsan sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo xeerarka iyo siyaasadaha xuquuqda madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), hay'addan waxa mamnuuc ka ah inay samayso takoor ku salaysan qowmiyad, midab, asalka wadanka, jinsiga (oo ay kamid yihiin aqoonsiga jinsiga iyo jihada galmada), caqiidada diimeed, naafanimo, da', aragtiyo siyaasadeed, ama aargoosi ka dhashay uloolanka xuquuqda madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxa lagu diyaarin karaa luuqado aan ahayn Ingiriisi. Shakhsiyaadka naafada ah ee u baahan qaabab kale oo xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (sida farta indhoolka, far waaweyn, cod dhegaysi, Luuqadda Dhegoolka Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobolka ama degaanka) ay ka codsadeen gunnooyinka. Shakhsiyaadka ah dhegoolka, dhegaha culus ama qaba naafanimo dhanka hadalka ah waxa ay USDA kala xidhiidhi karaan Adeegga Dadka Naafada ka ah Maqalka iyo Hadalka lambarka (800) 877-8339.

Si aad ugudbisato cabasho takoor barnaamij, Cawduhu waa in uu buuxiyo Foom ah AD-3027, Foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA oo laga heli karo onlayn ahaan barta: <https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/USDA-OASCR-P-Complaint-Form-0508-0002-508-11-28-17Fax2Mail.pdf>, ama uu ka heli karaa xafiis USDA ah, isaga oo wacaya (833) 620-1071, ama isaga oo qoraya warqad uu ku hagaajinayo USDA. Waraaqda waa inay ku xusnaato magaca, cinwaanka, lambarka taleefanka ee dacwoodaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ficilka takoorka ah ee la sheegtay oo si fiican oo faahfaahsan u qoran si uu u ogeysiyo Kaaliyaha Xoghaynta Xuquuqda Madaniga ah (ASCR) waxa uu yahay iyo taariikhda uu dhacay xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la sheegtay. **Foomka AD-3027 ee la buuxiyey ama waraaqda waa in loo gudbiyaa:**

limayl ahaan:

Adeegga Cuntada iyo Nafaqada, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; **AMA**

Faakis ahaan:

(833) 256-1665
ama
(202) 690-7442; **AMA**

limayl ahaan:

[FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov/](mailto:FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov)

Wakaaladdanu waxay bixisaa fursad loo simanyahay. **ARJIYO HA U DIRIN USDA.**

U MAGACAABISTA QOF WAR-GUDBIYE KALE AMA LACAG BIXIYE

- Haddii aad doonayso qof kale in uu helo nuqullada ogaysiisyada la xidhiidha arjigaaga iyo gunnooyinkaaga, waxa aad buuxisaa oo aad gudbisaa Foomka ESD ee 139AR si aad ugu magacawdo "war-gudbiyahaaga kale".
- Haddii aad doonayso qof kale in uu helo gunnooyinkaaga, waxa aad buuxisaa oo aad gudbisaa Foomka ESD ee 139AR si aad ugu magacawdo "lacag-bixiyahaaga kale".

Si aad u hesho foom, waxa aad wacdaa 1-800-479-6151 ama waxa aad gashaa barta <https://dcf.vermont.gov/mybenefits/resources>.

ARJIGA 3SQUARESVT-KA SNAP



Far waaweyn oo waadax ah ku qor oo su'aalaha uga jawaab si dhammaystiran oo daacad ah. Mahadsanid!

202 3SNP
Waxaa dib loo eegay 10/2022a

CODSANAYA: 3SquaresVT-ka SNAP 3SquaresVT-ka SNAP & Kaalmada Shidaalka

1. Naftaada wax nooga sheeg, ka codsade ahaan.

Magaca koowaad, magaca aabbaha, magaca awoowga & horgalaha (Jr., Sr., III, iwm.)		Taariikhda dhalashada (bb/mm/ssss)
Lambarka Sooshal Sekeyuuritiga	Lambar taleefan oo aanu kaa soo wici karno () -	Magaalada aad ku nooshahay
Cinwaanka boostada (cinwaanka waddada ama PO box-ka, magaalada, gobolka, zip code-ka)		
Cinwaanka guriga (haddii aanu ahayn cinwaanka boostada)		
Jinsiga: <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhedig	Ma tahay naafo? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ma tahay muwaadin Maraykan ah? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
SU'AALAHA HOOSE WAA IKHTIYAARI. KA JAWAABIDDU MA SAAMEYN DOONTO U QALMITAANKAAGA AMA GUNNOOYINKAAGA.		
Qowmiyadda (calaamadi ✓ dhammaan inta habboon): <input type="checkbox"/> Hindi Maraykan ah/Dhalad Reer Alaska ah <input type="checkbox"/> Eeshiyaan <input type="checkbox"/> Maraykanka Madaw/Afrikaanka ah <input type="checkbox"/> Caddaan <input type="checkbox"/> Dhalad Reer Hawai ah/Reer Pacific Island ka Kale <input type="checkbox"/> Waxkale		Isirka (calaamadi ✓ mid): <input type="checkbox"/> Hispanic/Laatiin <input type="checkbox"/> Aan ahayn Hispanic/Laatiin

2. Imika, aynu eegno inaad u qalanto inaad hesho gunnooyinka muddo 7 maalmood ah gudahood. Tan waxa loo yaqaanaa adeegga la dedejiyey. Ka jawaab dhammaan su'aalaha hoose ee loogu tagalay QOFKASTA oo codsanaya 3SquaresVT-ka SNAP.

Ma ka heshay gunnooyin cunto ah bishan gobolna?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Qofna ma yahay qaxoonti ama shaqaale beereed oo aan joogto ahayn?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Waa maxay wadarta dakhliga guud ee qof walba (<i>kahor inta aan waxba laga jarin</i>) bishan?	\$
Lacag intee le'eg ayaa qofkasta kaash ahaan iyo akownada bangiyeed ku haystaa?	\$
Waa intee kharashka kiradaada bishii ama kharashka deynta gurigaagu?	\$
Waa intee qarashka adeegyada gurigu (kulaylka, qaboojinta hawada, biyaha kulul, karinta & laambaduhu)?	\$

3. Laga soo bilaabo Sibtember 22, 1996, miyaa qof codsanaayey gunnooyin cunto:

Lagu xukumay dambi ah ku beddelashada gunnooyinka cuntada daroogo, qoryo, rasaas ama walxo qarxa?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Lagu xukumay dambi ah iibsashada ama iibinta gunnooyinka cuntada?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Lagu xukumay dambi ah si khiyaamo ah laba goor uga qaadasho gunnooyin cunto gobolna?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Ka baxsaday maxkamadeyn ama jebiyey sii deyntiisa shardiga leh ama baroobeeshinkiisa faldembiyeed weyn?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya

4. Miyaa qof kale ku nool yahay gurigaaga? Haa Maya

Haddii ay jawaabtaadu haa tahay, ku sheeg faahfaahinta halka hoose. Adeegso waraaq dheeraad ah haddii aad u baahato.

Magaca oo dhammaystiran (koowaad, xarafka koowaad ee magaca aabbaha, ka awoowga)		Jinsiga: <input type="checkbox"/> L <input type="checkbox"/> Dh	Taariikhda Dhalashada (bb/mm/ssss)		Lambarka Sooshal Sekeyuuritiga
Xidhiidhka uu la leeyahay codsaha	Ma yahay muwaadin Maraykan ah? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ma yahay naafo? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ma shaqeeyaa? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ma kula iibsadaa kulana sameystaa cuntooyinka? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	
Magaca oo dhammaystiran (koowaad, xarafka koowaad ee magaca aabbaha, ka awoowga)		Jinsiga: <input type="checkbox"/> L <input type="checkbox"/> Dh	Taariikhda Dhalashada (bb/mm/ssss)		Lambarka Sooshal Sekeyuuritiga
Xidhiidhka uu la leeyahay codsaha	Ma yahay muwaadin Maraykan ah? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ma yahay naafo? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ma shaqeeyaa? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ma kula iibsadaa kulana sameystaa cuntooyinka? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	
Magaca oo dhammaystiran (koowaad, xarafka koowaad ee magaca aabbaha, ka awoowga)		Jinsiga: <input type="checkbox"/> L <input type="checkbox"/> Dh	Taariikhda Dhalashada (bb/mm/ssss)		Lambarka Sooshal Sekeyuuritiga
Xidhiidhka uu la leeyahay codsaha	Ma yahay muwaadin Maraykan ah? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ma yahay naafo? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ma shaqeeyaa? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ma kula iibsadaa kulana sameystaa cuntooyinka? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	

KA JAWAAB SU'AALAH 5 ILLAA 7 EE KU SAABSAN NAFTAADA IYO QOFKASTA OO AAD LA IIBSATO LANA SAMAYSATO CUNTOOYINKA.

5. Miyaa qofna leeyahay hanti? Haa Maya

Tan waxa kamid noqon kara baabuur, akowno bangi, kaash, guri ama hanti kale. Adeegso waraaq dheeraad ah haddii aad u baahato.

Nooca hantida	Yaa iska leh?	Qiimaha hantida
		\$
		\$
		\$

6. Miyaa qofna bixiyaa masruuf ilme oo maxkamadi amartay? Haa Maya

Haddii ay jawaabtaadu haa tahay, yaa bixiya? _____ Xaddiga uu siiyo; \$ _____ kasta _____

7. A. Miyaa qofna ku bixiyaa wax ka badan \$35 bishii kharashaad caafimaad? Haa Maya

Tan waxa kamid ah kharashaadka sida kharash-wadaaga, daawooyinka dhakhtarku qoro, kharashyada caymiska caafimaadka iyo daryeelka ilkaha.

B. Haddii aad kaga jawaabtay haa halka sare, miyaa kharash-bixinuhu ka badan yihiin \$151 bishii? Haa Maya

KA JAWAAB SU'AALAH 8 ILLAA 11 EE LOOGU TALAGALAY QOFKASTA OO KU NOOL GURIGA, OO ADIGA LAFTAADU AAD KU JIRTO.

8. Miyaa qofna leeyahay dakhli? Haa Maya

Tan waxa ku jiri kara masruufka ilmaha, gunnooyinka naafada, guulaha bakhtiyaa nasiibka/khamaarka, gunnooyinka hawlgabka, SSI/AABD & gunnooyinka lagu bixiyo Ciidannimada Hore. Adeegso waraaq dheeraad ah haddii aad u baahato.

Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha	Nooca dakhliga	Xaddiga guud & inta jeer ee la qaato	Lagu qaato naafanimu?
		\$ kasta	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
		\$ kasta	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
		\$ kasta	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
		\$ kasta	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
		\$ kasta	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya

9. Ma kiraysaa gurigaaga ama qol aad ku leedahay guri qofkale? Haa Maya

Haddii ay jawaabtaadu haa tahay, ku sheeg faahfaahinta halka hoose.

Yaa bixiya kirada?	Intee baa la bixiyaa?	Maxaa ku jira kiradaada?
	\$ kasta	<input type="checkbox"/> Qol keliya <input type="checkbox"/> Kuleyl <input type="checkbox"/> Adeegyo <input type="checkbox"/> Cuntooyin

10. Ma adigaa iska leh gurigaaga? Haa Maya Haddii ay jawaabtaadu haa tahay, faahfaahinta ku sheeg halka hoose.

Nooca kharash bixinta	Yaa bixiya?	Intee baa la bixiyaa?	Imisa jeer baa la bixiyaa?
Deyn guri keliya		Raasamaal \$ Dulsaar \$	
Deynta lagu qaato qiimaha guriga		Raasamaal \$ Dulsaar \$	
Caymiska (hoyga keliya)		\$	
Kirada dhulka		\$	
Kharashyada adeegyada guriga		\$	
CASHUURTA HANTIDA SANADII			Yaa bixiya?
Wadarta cashuurta \$	Kharash bixinta gobolka \$	Cashuurta saafiga ah ee la bixiyo \$	

11. Ma bixisaa kharashka adeegyada guriga? Haa Maya Haddii ay jawaabtaadu haa tahay, faahfaahinta ku sheeg halka hoose.

Yaa bixiya kharashka adeegyada guriga?	Dooro dhammaan inta habboon
	<input type="checkbox"/> Kuleylka <input type="checkbox"/> Biyaha kulul <input type="checkbox"/> Karinta <input type="checkbox"/> Laambadaha <input type="checkbox"/> Qaboojinta hawada <input type="checkbox"/> Taleefanka
	<input type="checkbox"/> Kuleylka <input type="checkbox"/> Biyaha kulul <input type="checkbox"/> Karinta <input type="checkbox"/> Laambadaha <input type="checkbox"/> Qaboojinta hawada <input type="checkbox"/> Taleefanka
	<input type="checkbox"/> Kuleylka <input type="checkbox"/> Biyaha kulul <input type="checkbox"/> Karinta <input type="checkbox"/> Laambadaha <input type="checkbox"/> Qaboojinta hawada <input type="checkbox"/> Taleefanka



KAALMADA SHIDAALKA

Haddii aad jeclaan lahayd inaad codsato Kaalmada Shidaalka:

- ➔ Waxa aad ka jawaabtaa su'aalaha 12 illaa 15, oo
- ➔ Waxa aad calaamadisaa sanduuqa "3SquaresVT-ka SNAP & Kaalmada Shidaalka" ee ku yaalla halka sare ee bogga koowaad.

12. Faahfaahin ka bixi shidaalka aad adeegsato iyo gurigaaga.

Nooca MUHIIMKA AH ee shidaalka ee loo adeegsado in lagu kulayliyo guriga (calaamadi mid)	Tirada qolalka hurdada
<input type="checkbox"/> Dhuxul-dhagax <input type="checkbox"/> Koronto <input type="checkbox"/> Kiroosiin <input type="checkbox"/> Gaasta dabiiciga ah <input type="checkbox"/> Saliid <input type="checkbox"/> Pellets <input type="checkbox"/> Gaasta propane-ta <input type="checkbox"/> Xaabo <input type="checkbox"/> Waxkale _____	# _____
Faahfaahin ku saabsan gurigaaga	Kaalmada kirada, haddii ay jirto
<input type="checkbox"/> Apartment <input type="checkbox"/> Guri guurguura <input type="checkbox"/> Guri hal-qoys <input type="checkbox"/> Waxkale _____	<input type="checkbox"/> Qaybta 8 <input type="checkbox"/> Guryaha Dawladda <input type="checkbox"/> Waxkale _____

13. Ma u bixisaa kharashka shidaalka ama korontada si toos ah? Haa Maya Haddii ay jawaabtaadu haa tahay, ku faahfaahi halka hoose.

SHIDAALKA:	Magaca ku qoran akownka	Lambarka akownka	
Magaca & cinwaanka iibiyaha	Lambarka taleefanka iibiyaha		
KORONTADA:	Magaca bixiyaha	Magaca ku qoran akownka	Lambarka akownka

14. Ma kula nool yahay qof aad siiso daryeel ama adeegyo? Haa Maya Haddii ay jawaabtaadu haa tahay, ku sheeg faahfaahinta halka hoose.

Magaca koowaad, xarafka hore	Nooca daryeelka:	<input type="checkbox"/> Daryeelka shakhsiyeed ee caafimaad ahaan daruuriga ah <input type="checkbox"/> Adeegyada aan caafimaadka ahayn ee guri-hayaha/daryeelaha
------------------------------	------------------	--

15. Miyaa qofna dakhli ka helaa shaqo ama is-shaqaalaysiin? Haa Maya Haddii ay jawaabtaadu haa tahay, ku sheeg faahfaahinta halka hoose.

Magaca koowaad, xarafka hore	Nooca dakhliga	Dakhliga
	<input type="checkbox"/> Shaqo <input type="checkbox"/> Is-shaqaalaysiin	\$ kasta
	<input type="checkbox"/> Shaqo <input type="checkbox"/> Is-shaqaalaysiin	\$ kasta
	<input type="checkbox"/> Shaqo <input type="checkbox"/> Is-shaqaalaysiin	\$ kasta

Diiwaangelinta codbixiyaha: Haddii aanad u diiwaangashaneyn inaad ka codayso halka aad ku nooshahay, ma jeclaan lahayd inaad hesho arjiga diiwaangelinta codbixiyaha? Haa Maya

Haddii aad calaamadin weydo sanduuqna, waxa lagu tixgelin doonaa inaad go'aansatay inaanad isku diiwaangelin inaad codayso wakhtigan. Codsiga isku diiwaangelinta ama diidista isku diiwaangelinta codbixinta ma saameyn doonto u qalmitaankaaga gunnooyinka ama lacag ay ku siiso ESD. Haddii aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo buuxinta foomka arjiga isku diiwaangelinta codbixiyaha, waanu ku caawin doonaa. Go'aanka ah inaad raadsato ama aqbasho caawimo adiga ayaa iska leh. Waxa aad u buuxin kartaa foomka arjiga si qarsoodi ah. Haddii aad aaminsan tahay in qof uu farageliyey xaqa aad u leedahay isku diiwaangelinta ama diidista isku diiwaangelinta codbixinta, xaqa aad u leedahay qarsoodinimada go'aansashada inaad isku diiwaangeliso ama codsashada inaad isku diiwaangeliso codbixinta, ama xaqa aad u leedahay inaad doorato xisbigaaga siyaasadeed ama doorbiditaan siyaasadeed oo kale, waxa aad cabasho u gudbisaa kartaa Xoghaynta Xafiiska Gobolka ee ku yaalla 128 State Street, Montpelier, VT 05633-1101, ama waxa aad wici kartaa 1-802-828-2363, ama 1-800-439-8683 (layn bilaash ah).

METELAAD & CAAWIMO

Si aad u hesho foom ku xusan halka hoose, waxa aad wacdaa 1-800-479-6151 ama waxa aad gashaa barta <https://dcf.vermont.gov/mybenefits/resources>.

Ma doonaysaa qof kugu metela arjigan? Tani waxa ay u ogolaan doontaa inay saxeeaan arjigan oo ay kugu metelaan arrimaha la xidhiidha. Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, buuxi Foomka ESD ee 139REP oo bixi cadeynta loo baahan yahay (sida, awood qareen ama amar maxkamdeed).

Haa
 Maya

Ma doonaysaa inaanu la wadaagno macluumaadka ku saabsan arjigaaga & gunooyinkaaga qof kaa caawiyey buuxinta arjigan? Haddii ay jawaabtaadu haa tahay, macluumaadkooga xidhiidhka ku bixi halka hoose:

Haa
 Maya

Magaca/hay'adda: _____ Lambarka taleefanka: _____

SAXEEX HOOS

ARJIYADA AAN LA SAXEEXIN WAA LA SOO CELIN DOONAA SI LOO SAXEEXO.

Marka aan saxeeexo hoos, waxa aan qirayaa aniga oo mudanaya ciqaabta dhaarta beenta ah in macluumaadka ku jira arjigan oo ay kamid yihiin macluumaadka la xidhiidha xaaladda muwaadinimada iyo ajnabinimada xubnaha qoyska ee codsanaya gunnooyinka, ay sax yihiin oo ay dhammaystiran yihiin inta ogaalkayga ah ee aan aaminsanahay.



Saxeexa codsadhaha/wakiilka igman

Taariikhda

XUQUUQAHAAGA IYO MASUULIYADHAAGA

Haddii aad u baahato in lagaa caawiyo fahankooga, aad jeclaan lahayd nuqul (far waaweyn ah) ama jeclaan lahayd inaad nuqul ka hesho arjigan, waxa aad wacdaa 1-800-479-6151.

- 1. Waxa aad xaq u leedahay dhegaysi caddaalad ah haddii aad diiddo go'aanka ku saabsan gunnooyinka.**
Kiiskaaga adiga ayaa isku meteli kara ama waxa ku meteli kara wakiil (sida, qareen, qaraabo ama saaxiib). Si aad u codsato mid:
 - Waxa aad ka wacdaa ESD lambarka 1-800-479-6151.
 - Waxa aad u qortaa *Guddoomiye Ku Xigeenka ESD, HC 1 South, 280 State Drive, Waterbury, VT 05671-1020.*
 - Waxa aad u qortaa *Guddiga Adeegyada Aadanaha, 14-16 Baldwin St., Second Floor, Montpelier, VT 05633-4302.*
- 2. Waxa aad xaq u leedahay go'aan wakhtigiisu munaasab yahay.** Iyada oo aad dib u dhac sababto adigu, dhakhtar, xaalad degdeg ah oo aan la fileyn, ama mushkilad maamul oo ka baxsan awoodda ESD moojee, waxa aad filan kartaa go'aan muddo 30 maalmood ah gudahood oo ka bilaabmaya marka aad gudbiso codsigaaga.
- 3. Waxa aad xaq u leedahay sirmimo iyo qarsoodinimo.** ESD ma wadaagi doonto macluumaadkaaga haddii aan loo adeegsanayn maamulka barnaamijka, oo uu ogolaaday sharci ama amar maxkamadeed, ama aad adigu ogolaatay.
- 4. Adiga ayaa masuul ka ah soo sheegista isbeddelada:**
 - Isbeddelada cinwaanka.
 - *Kaalmada Shidaalka:* Waxa aan ogolahay inaan soo sheego isbeddelada ku yimaadda meesha aan ku noolahay, dadka ila nool, sida gurigayga loo kulayliyo, cidda iga iibisa shidaalkayga, iyo korodhka iyo hoos u dhaca dakhliga ka yimaadda ishuu doono ha ka imaadee muddo 10 maalmood ah gudahood oo ka bilaabma marka ay dhacaan.
 - *3SquaresVT-ka SNAP:* Waxa aan ogolahay ka warbixinta isbeddelada ku yimaadda dadka ila nool, qofkasta oo hela shaqo, ama bilaaba is-shaqaalaysiin muddo 10 maalmood ah gudahood kadib bisha isbeddelku dhacay.
- 5. Waa inaad bixiso lambarka Sooshal Sekeyuuritiga (SSN) qofkasta oo codsanaya.** Sharciga federaalku waxa uu waajibinayaa tani inay shardi u noqoto u qalmitaanka (42 U.S.C. §1320b-7). Barnaamijyada qaar waxa ay uga tanaasuli karaan shardigan xubno kamid ah urur diimeed diida bixinta lambarrada Sooshal Sekeyuuritiga. ESD waxa uu adeegsadaan SSNs si ay u fuliyaan kharash bixinada masruufka ilmaha, uga hortagaan shakhsiyaadku inay laba jeer qaataan gunnooyinka, u xaqiijiyaan saxnaanta iyo runsheegnimada macluumaadka la bixiyey iyo waxkale oo dheeraad ah.
- 6. Waa inaad ugu sheegto ESD si dhakhso ah haddii xubin kamid ah qoyskaagu:**
 - Ay laba jeer qaadato gunnooyinka cuntada gobol kale, ama
 - Lagu xukumay dambi 10 kii sano ee lasoo dhaafay dambigaags oo ah been ka sheegista halka uu ku noolaa si uu gunnooyinka uga qaato wax ka badan hal gobol.
- 7. Waa inaad la shaqayso ESD haddii arjigaaga loo doorto si loogu sameeyo dib u eegista xakameynta tayada.**
Tan waxa kamid ah keenista caddeynta macluumaadka loo baahan yahay ama inaad noo ogolaato inaanu helno haddii aanad awoodin.
- 8. Waxa aad u ogolaanaysaa Guddoomiyaha Cashuuraha ee Vermont in uu macluumaadkaaga cashuur celinta dakhligaaga gobolka uu tuso Guddoomiyaha DCF ama wakiilkiisa. (33 V.S.A. §112 (c)).**
- 9. Haddii aad hesho 3SquaresVT-ka SNAP, magacyada carruurtaada waxa loo diri doonaa Hay'adda Waxbarashada si ay u xaqiijiso u qalmitaankooga cuntooyin dugsiga oo bilaash ah.** Haddii aanad dooneyn ESD inay tan samayso, waxa aad wacdaa 1-800-479-6151 isla markaba. Waxa aad beddeli kartaa go'aankaaga hadhaw oo waxa aad ku buuxin doontaa arji dugsiga.
- 10. Waa inaanad ka beensheegin ama aanad qararin macluumaad si aad u hesho gunnooyin aanay ahayn**

qoyskaagu in uu helo. Waa khiyaano inaad si kas ah u bixiso macluumaad been ah ama marin habaabin ah, aad isku daydo inaad hesho, ama qof kale ku caawiso in uu helo gunnooyin cunto ama shidaal.

11. Adiga ayaa masuul ka ah saxnaanta macluumaadka lagu sheegay arjigan. Waxa aanu ku xaqiijin doonaa macluumaadka la sheegay ilo kala duwan, oo ay kamid yihiin saraakiil heer federaal, gobol iyo degmo ah. Tan waxa kamid ah macluumaadka ku saabsan xaaskaaga ama lammaanaha aad isla nooshihiin, carruurtaada iyo xubnaha qoyskaaga ee kale. Waxa aad u ogolaatay ESD inay la xidhiidho loo shaqeeye(yaashaada) si ay u xaqiijiso macluumaadka shaqada iyo dakhliga iyada oo ujeedku yahay go'aaminta u qalmitaanka gunnooyinka ee qoyskaaga. Haddii aanad doonayn ESD inay la xidhiidho loo shaqeeye(yaasha), waa inaad ka wacdaa Xarunta Adeegga Gunnooyinka si dhakhso ah lambarka 1-800-479-6151. Macluumaadka lagu heli karo Nidaamka Xaqiijinta Dakhliga iyo U Qalanka (Income and Eligibility Verification System, IEVS) waa la codsan doonaa, la adeegsan doona waxana laga xaqiijin doonaa dhinacyo saddexaad marka ESD ay aragto inay jiraan qaladaad. Haddii macluumaadka aad bixisay aanu sax ahayn, gunnooyinka waa la yareyn karaa, waxa lagaa dalban karaa inaad dib u bixiso gunnooyinka, waxa lagu diidi karaa gunnooyinka, waxana aad mari kartaa dacwad dhagaysi ah oo uqalmitaankaaga lagu joojinayo oo maamul iyo maxkamadeyn faldembiyeed.

12. Waa inaad si khaldan ugu adeegsan gunnooyinkaaga cuntada wax ka mid ah qaababka soo socda maadaama oo loo tixgeliyo ganacsi sharci darro ah:

- libinta gunnooyinkaaga cuntada.
- Ku beddelashada gunnooyinkaaga cuntada — ama u adeegsiga gunnooyinkaaga cuntada inaad ku iibsato — walxo aan cunto ahayn, khamri, waxyaabaha ka samaysan tubaakada, daroogooyinka shari darrada ah, qoryo, rasaas ama walxaha qarxa.
- U ogolaanshaha qof in uu u adeegsado kaadhkaaga EBT ga, wax aan ka ahayn in uu qoyskaaga ugu soo iibiyo cunto.
- Adeegsiga, ama haysashada, kaadh(adhka) EBT-ga ee qofkale, adiga oo cunto ugu iibinaya qoyskiisa mooyee.
- Haddii aad cunto ku iibsanayso dayn, inaad u adeegsato gunnooyinkaaga cuntada inaad isaga bixiso deynta, xattaa haddii kharashka lagugu soo dallacay yahay ka cuntada oo keliya.

13. Adiga ama qof kale oo weyn oo qoyskaaga kamid ah ayaa lagu furi karaa baadhitaan khiyaano, ganacsi sharci darro ah, ama labadaba waxana aad mari kartaan dacwad dhagaysi ah oo uqalmitaankaaga lagu joojinayo oo maamul iyo/ama maxkamadeyn faldembiyeed. Haddii adiga ama qof weyn oo qoyskaaga kamid ah lagu helo dembi ah khiyaanada 3SquaresVT-ka SNAP ama Kaalmada Shidaalka maxkamad dhexdeed, ciqaabtu waxa ay noqon kartaa **illaa saddex sanno oo jeel ah iyo ganaax lacageed oo ah illaa \$1,000.** Waxa sidoo kale suuragal ah in la idin ku soo rogo ganaax lacageed oo ah **illaa \$250,000, aad mudataan xadhig ah illaa 20 sano, ama labadaba,** haddii la idin ku helo dembi ah ganacsi sharci darro ah oo ah 3SquaresVT maxkamad dhexdeed. Haddii adiga ama qof weyn oo kamid ah qoyskaaga ay idinku hesho dembi ah khiyaanada ama ganacsiga sharci darrada ah ee 3SquaresVT, hay'ad maamul ama maxkamad midkood, xanibaadda 3SquaresVT waxa ay noqon doontaa **hal sanno marka koowaad ee xadgudubka aad samayso, laba sano ka labaad, marka saddexaadna gabi ahaanba waa lagaa joojin doonaa.** Haddii adiga ama xubin kamid ah qoyskaaga lagu helo dembi ah ku beddelashada ama ku ganacsiga daroogo sharci darro ah adigoo adeegsanaya 3SquaresVT, xanibaaddu waa **laba sano xadgudubka koowaad iyo marka labaadna gabi ahaanba waa lagaa joojin doonaa.** Haddii aad ka hesho gunnooyin cunto laba gobol isku wakhti, xannibaaddu waa 10 sano. Haddii adiga ama qof weyn oo qoyskaaga kamid ah lagu helo dembi ah dhacdo ganacsi sharci darro ah oo ka badan \$500 ama ku beddelashada qoryo, rasaas, ama walxaha qarxa 3SquaresVT, xanibaaddu waa **mid inta nolashaada ka hadhayba.** Sida ay dhigayaan Xeerka Cuntada iyo Nafaqada ee 2008, 7 C.F.R Qaybta 273.16b, 42 U.S.C Qaybaha 1320a-7b iyo 33 V.S.A Qaybaha 141, 143 kuwan iyo ciqaabaha federaalka iyo gobolka ayaa sidoo kale habboonaan kara.

14. Waa inaad aqbasho adeegyo cimileyn oo bilaash ah haddii aad hesho Kaalmo Shidaal.

Taas waxaa dheer, inaad sidoo kale u ogolaato:

- Shirkadda ama shirkadaha tamartaada inay siiyaan ESD xogta ku saabsan isticmaalka tamareed ee sannadlaha ah, kharashka, adeegsiga, lacagta adeegyada, kharash bixinta iyo macluumaadka akown ee kale.
- ESD inay hesho oo ay wadaagto xogtan.